Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada

# Dhisida is Aaminka

## Iskaashiga ka Dhaxeeya Bulshada iyo Boliiska

Barnaamijka isku xirka ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS), Adkeynta Iskaashiga Boliiska iyo Bulshada (loo soo gaabiyo (SPCP)), waxaa loogu tala galay inuu kor u qaado sugidda nabada dadka ayadoo la adkeynaya is aaminka iyo iskaashiga u dhaxeeya shaqaalaha nabad sugidda iyo bulshooyinka kala duwan oo ay u adeegaan.

Barnaamijka halka maalin socda ee SPCP waxuu isku keenaa nabad sugidda deegaanka iyo hormuudka bulshada si ay uga hadlaan ee u caddeeyaan iskulana xaliyaan dhibaatooyinka si wada jir ah. Barnaamijka SPCP waxaa loo fududeyn karaa si dadaal kahortag ah ama ka jawaabid markey khatar dhacdo. Barnaamijwa waxaa kaluu caawin karaa in hormuudka deegaanka ay wax ka qabtaan aamin darro soo jireen ah iyo caqabado kale ee wax u dhimo iskaashiga boliiska iyo bulshada. Natiijada barnaamijka SPCP waa qorshe ficil ah oo loo hirgeliyo si lataaban karo ayadoo la kaalmeysanayo Golaha SPCP ee loo aasaasay inuu kamid noqdo barnaamijka.

**Maxey bulshada u tixgelinayaan SPCP?**

**SPCP waxaa loogu tala galay inay kordhiso tayada deegaanka, horumariso iskaashiga, ayna xal deegaan u hesho dhibaatooyinka deegaanka**

**SPCP waxay kaalmeysaa la xriirka nabad sugidda iyo dadaalada is dhexgalka**

### Dulmarka Guud ee Barnaamijka

**Talaabada 1: Qabashada koox qorsheed deeganka ah ee isku dhaf ah** CRS waxay qabataa koox qorsheed ka kooban shaqaale nabad sugid ee deegaanka ah iyo hormuudka bulshada, ee caawin ka geysta dadaalka eena sameeya howlaha muhiimka ah.

**Talaabada 2: Tababarka fududeeyayaal deegaanka ah**

CRS waxay tababartaa xubnaha bulshada si ay u fududeeyaan wadahadalka koox yar ee kamid ah barnaamijka SPCP. Tababarkan waxuu ka caawiyaa dhisidda tayo deegaanka ah ayadoo bareyso fududeeyayaasha tabarruca ku shaqeeya sida loo xaliyo iskudhaca eena fududeynaysa xal raadinta dhinacyada kala duwan ee daneeeya arrintan.

**Talaabada 3: Fududeynta qaab u socodka SPCP**

Ayadoo lagu fududeynaya kulamo gaar-gaar ah, ka qeyb galayaasha waxay ka shaqeeyaan sida loo caddeeyo arrimaha caqabada ku ah is aaminka u dhaxeeya nabad sugidda iyo bulshada iyo wada raadinta xalka wax looga qabto arrimahaas.



**Talaabada 4: Qoridda Qorshe Ficil ah ee SPCP** Barnaamijka SPCP waxuu soo saaraa qorshe ficil ah ee u adeega sidii loo jiheyn lahaa Golaha SPCP inay xal la taaban karo ku hirgeliyaan xiligiga lagu jiro kulannadaan fududenyta ah.

**Talaabada 5: Helidda iyo isku keenka Golaha SPCP**

Golaha SPCP waxaa loo aasaasaa si loo sii qeexo lana hirgeliyo xalka la horumariyay barnaamijkan. Golaha waxuu matalaa la taliya ahaan waxuuna la shaqeeyaa hormuudka nabad sugidda si loo hirgeliyo qorshe ficil ee sugan.

## Waa Ayo CRS

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaatada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

## Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

## Xagee ka Shaqeynaa

**Xarunta CRS**
Washington, DC

**Xafiisyada Gobolada CRS**

**New England**
Boston, MA

**Waqooyi-bari**
New York, NY

**Atlantiga-Dhexe**
Philadelphia, PA

**Konfur-bari**
Atlanta, GA

**Galbeedka-dhexe**
Chicago, IL

**Konfur-galbeed**
Dallas, TX


**Dhexda**
Kansas City, MO

**Buuraleyda**
Denver, CO

**Galbeedka**
Los Angeles, CA

**Waqooyi-galbeed**
Seattle, WA

**Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada**
Miami, FL
Houston, TX
Detroit, MI
San Francisco, CA




## Naga hel, nagala xiriir

**www.justice.gov/crs**

facebook.com/DOJCRS/

@DOJ_CRS

askcrs@usdoj.gov

202.305.2935

Wixii macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.

https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices